

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ



القيادة العسكرية
ARMED FORCES COMMAND
TALISKA CIIDANKA

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ
لِشَرِّعِ الْعَاجِلِ
FOR IMMEDIATE RELEASE



حركة الشباب المجاهدين
HARAKAT AL-SHABAAB AL MUJAHIDEEN
XARAKADA MUJAAHIDIINTA AL-SHABAAB

“Faahfaahin dagaallo Shabeellada hoose/dhexe”

15 Ramadaan 1446 H (15 Maars 2025)

Ciidamada Mujaahidiintu waxay saakay oo Sabti ah weerar cagmarin ah ku qaadeen saldhigiyadii ay cadawga murtadiinta ah ku lahaayeen degmada Awdheegle ee Wilaayada Islaamiga ah ee Shabeellada hoose. Weerarka oo billawday salaaddii subax kadib ayay Mujaahidiintu dhawr jijo kaga qaadeen ciidamada murtadiinta ee cadawga ku ah shareecada Islaamka.

Dagaal kooban kadib, Mujaahidiintu waxay – Allaah fadligiis - si buuxda ula wareegeen dhamaan degmada Awdheegle oo ay ku jiraan goobaha istiraatijiga ah sida buundada magaalada iyo saldhigiyadii ay murtadiintu kaga sugnaayeen Awdheegle. Khasaaraaha cadawga ee dagaalka waa 31 dhimasho ah oo ay ku jiraan saraakiishii hogaaminaysay murtadiinta la weeraray, iyo 36 dhaawac ah. Mujaahidiinta ayaa sidoo kale gacanta ku dhigay hub, saanad iyo maxaabiis laga qabtay cadawgii jabay.

Ciidamada Mujaahidiintu waxay intii uu socday dagaalka Awdheegle kamiin u dhigeen kolonyo murtadiin ah oo gurmad u ahaa cadawga xilli ay marayeen deegaanka Lafoole. Waxaa halkaas cadawga looga dilay 3 murtad, waxaa laga dhaawacay 4 kale, waxaana laga gubay gaari Cabdi bile ah. Kamiin labaad oo galabta ka dhacay isla deegaanka Lafoole waxaa cadawga looga gubay gaari Beebe ah.

Dhanka Shabeellada dhexe, ciidamada Mujaahidiinta ayaa dagaal kula wareegay deegaanka Sumadaale oo hoostaga degmada Cadale. Dagaalka ayaa lagu qaaday ciidamo murtadiin ah oo dhawaan laga soo abaabulay magaalada Muqdisho kuwaas oo gurmad u ahaa maleeshiyada ridada ah ee lagu jebiyay, lagalana wareegay deegaano badan oo ku yaalla bariga Wilaayada Shabeellada dhexe. Tirada aan sida rasmi ah u xaqijinay in cadawga looga dilay dagaalkas waa 22 askari oo dhimasho ah, kuwaas oo 10 kamid ah ay cadawgu maydadkooda goobta dagaalka uga carareen, iyo 43 dhaawac ah oo ay u qaadeen dhanka deegaanka Xaaji Cali oo 7 kiilomitir u jira deegaanka uu dagaalku ka dhacay ee Sumadaale. Mujaahidiinta ayaa ghaniisaystay hub iyo saanad ay cadawgu uga carareen goobta dagaalka.

Isla Wilaayada Islaamiga ah ee Shabeellada dhexe, dagaal lagu jabiyeey ciidamada ridada ah ayaa ka dhacay duleedka deegaanka Laba-Garas ee hoostagna degmada Cadale. Cadawga ay Mujaahidiintu halkaas kula dagaalameen ayaa ahaa calooshood u shaqaystayaasha murtadiinta ah ee uu Maraykanku ku shaqaysto, waxaana hawada ka taageerayay diyaaradaha saliibiyiinta. Khasaaraaha la gaarsiiyay waa 7 askari oo dhimasho ah, 4 dhaawac ah iyo gaari Cabdi bile qori dhashiike ah saaranyahay oo laga ghaniimaystay.

Taliska ciidamada Mujaahidiitu wuxuu u mahad celinayaan Allaah – Subxaanahu Watacalaa- kaidbna wuxuu bogaadinayaan hawgallada ay geesiyyada Tawxiidku ka wadaan Wilayaatka Hiiraan, Shabeellada dhexte iyo Shabeellada hoose, kuwaas oo lagu xoreeyay degmooyin iyo deegaanno ay cadawgu xoog ku haysteen, dibna loogu soo celiyay xukunka shareecada Islaamka.

Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab waxay u dagaallameysaa dhawritaanka badqabka Ummadda Muslimka ah, hirgelinta Shareecada Islaamka iyo inay dhammaan dhulalka Muslimiinta ka xoreyso gaalada iyo murtadiinta dabahilifka u ah. Mar kale waxay Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab ku celinaysaa dalabkii ahaa in dadka Muslimiinta ah ay ka fogaadaan saldhigiyada, xarumaha iyo xafiisyada cadawgu ku leeyihiin degmooyinka iyo deegaanada ay xoogga uga haystaan ummada Soomaaliyeed ee Muslimka ah.

Waxay Xarakada Mujaahidiinta Al-Shabaab ballan ku qaaddeysaa inay sii wadi doonto Jihaadka ka dhanka ah isbahaysiga caalamiga ah ee saliibiyyinta iyo dabahilifyadooda murtadiinta ah illaa ay geyiga Soomaaliyeed ka saareyso cadowga hororka ah ee ku soo duuley, iyo illaa diinta dhamaanteed ay Allaah keliya u sugnaaneyso. Allaah, subxaanahu watacaalaa, wuxuu yiri

وَقَاتِلُوهُمْ حَتَّىٰ لَا تَكُونَ فِتْنَةٌ وَيَكُونَ الدِّينُ لِلَّهِ فَإِنِ انْتَهُوا فَلَا عُذْوَانَ إِلَّا عَلَى الظَّالِمِينَ [البقرة: 193]



﴿ وَلِلَّهِ الْعَزَّةُ وَرَسُولُهُ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَكِنَّ الْمُنَفِّقِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴾

"But honour belongs to Allah and His Messenger, and to the Believers; but the Hypocrites know not"